


**Maxaad samaysaa  
markaa aadan haysan  
lacag kugu filan oo aad  
kirada isaga bixiso?**



VAKE



Vantaa



### **1. La xiriir mulkiilaha gurigaaga**

- Haddii aad hesho farriin lagugu xusuusinayo inaad lacagta kirada iska bixiso, isla markiiba la xiriir mulkiilaha guriga. Haddii ay jirto kiro aadan iska bixin, gurigaaga ayaad lumin doontaa.
- Weydii mulkiilaha guriga inta ay dhan tahay kirada lagugu leeyahay. Haddii aadan isla markiiba iska bixin karin, weydii inaad kala gorgortami karto jadwalka lacag-bixinta.

### **2. La xiriir adeegyada talo-bixinta guryaha**

- Talo-bixinta guryaha waxay kaa caawisaa xaaladaha deynta kirada iyo arrimaha kale ee la xiriira guryaha. Turjubaan ayaad codsan kartaa.
- Talada guryaha ee Magaalada Vantaa (City of Vantaa housing advice): [asumisneuvonta@vantaa.fi](mailto:asumisneuvonta@vantaa.fi), +358 9 8395 0410
- Talada Guryaha ee Adeegyada Fayo-qabka ee Ismaamulka Vantaa iyo Kerava (Housing advice of the Wellbeing Services County of Vantaa and Kerava, VAKE): [asumisneuvonta@vakehyva.fi](mailto:asumisneuvonta@vakehyva.fi), +358 40 192 7766
- Mulkiilayaasha guryaha qaarkood ayaa sidoo kale bixiya talo ku saabsan guryaha.

## **Ma dhib ayaa kaa haysta bixinta kirada? Tallaabo qaad goor hore oo raadso caawimaad**

### **3. Ogow haddii aad heli karto taageero dhaqaale**

- Ka codso Kela gargaarka aasaasiga ah ee bulshada.
- La xiriir la-talinta bulshada ee VAKE. Haddii aad leedahay shaqaale bulsheed oo kuu gaar ah, si toos ah ula xiriir.
- La-taliyaha bulshada ama shaqaalahaaga bulshaeed ayaa kaa caawin karaan inaad ogaato inaad heli karto kaalmo bulsheed oo dheeraad ah ama kahortag ah.

### **4. Hel taageerada loogu talagalay qorsheynta maaliyadeed iyo maaraynta nolosha maalinlaha ah**

- Isku day inaad marka hore bixiso kirada, xitaa haddii aysan lacagtu kugu filnayn.

- Vantaa ayaa kaa caawin karta arrimaha dhaqaalaha iyo nolosha maalinlaha ah:
1. La-talinta bulshada ee VAKE waxay kaa caawinaysaa inaad raadsato adeegyada bulshada (la sheekayso oo ka wac +358 9 4191 7010).
  2. Rugta Maaliyadda (Financial Clinic) waxay u furan tahay Talaado kasta si maalin-dhaaf dhaban ah laga bilaabo 12:30 ilaa 15:00 Vernissakatu 8 C.
  3. La-talinta dhaqaalaha iyo deynta (oikeus.fi, +358 29 566 0175 maalmaha shaqo 9.00–12.00).
  4. Hagista Luuqadaha Kala Duwan ee Vantaa wuxuu kaa caawinayaa inaad adeegyo hesho, +358 9 8395 0930, monikielinen.neuvonta@vantaa.fi

### **5. Haddii aad hesho farriin lagugu xusuusinayo inaad lacagta kirada iska bixiso – tallaabo qaad isla markiiba**

- La xiriir talo-bixinta guryaha ama adeegyada bulshada iyo mulkiilaha gurigaaga.
- Haddii aad ka hesho ogeysiis ah inaad guriga ka guurto oo ka socda Hay'adda Fulinta Qaranka ee Finlaan, la xiriir iyaga. Macluumaadkooda xiriirka ayaa ku qoran warqadda.

### **6. Isla ilaali inay xaaladdu soo noqnoqoto**

- Qorshee kharashkaaga oo dejiso miisaaniyad billaha soo socda. La soco dakhligaaga iyo kharashaadkaaga.
- Miyay jiraan saaxiibo ama xirfadleyaal ku caawin karaan mustaqbalka?

#### **La-talinta guryaha ee Vantaa**

Waxay bixiyaan talo ku saabsan arrimaha guryaha kirada ah.  
[www.vantaa.fi/en/services/service/housing-advice](http://www.vantaa.fi/en/services/service/housing-advice)



#### **La-talinta bulshada ee VAKE**

Waxay kaa caawinayaan inaad hesho adeegyada bulshada.  
 Weydiiso turjubaan haddii loo baahdo.

[www.vakehyva.fi/en/services/service/counselling-adult-social-work](http://www.vakehyva.fi/en/services/service/counselling-adult-social-work)



#### **Hagista Luuqadaha Kala Duwan ee Vantaa**

Hagista adeegyada magaalada, hay'adaha dawladda iyo ururada bulshada

[www.vantaa.fi/en/city-and-the-decision-making/customer-service-and-advice/vantaa-multilingual-guidance](http://www.vantaa.fi/en/city-and-the-decision-making/customer-service-and-advice/vantaa-multilingual-guidance)



